

# Nidaamka Maamulka Dhacdooyinka

Incident Command System

*Qaab Wax Looga Qabto Xaaladaha Degdegga ah*

## Marka aad hoggaan u tahay wax ka qabadka, waxaad xusuusnaataa:

Muhiimaddaada weyn in ay badbaadintu tahay: ❶ nolosha ❷ bey'adda ❸ hantida

Xiriirka fiican ayeey ku xiran tahay guusha ama khasaaraha wax ka qabadka dhibaatooyinka.

Si aad u gaartid go'aanada ugu wanaagsan, waa in aad degganaatid islamarkaana aad ahmiyad saartid.

## Tusmada Wax Ka Qabadka Dhibaatooyinka

**Maamulka Dhacdooyinka :** Waxaa uu maamulaa wax ka qabadka; dhiirigeliyaa

islamarkaana u xil saaraa hoggaamiyeyaasha kooxda; dejiyaa qaabka iyo heerarka wax ka qabadka. Waxaa uu dhiirigeliyaa xiriirka iyo wada shaqeynta kooxda.

● **Sarkaalka Badbaadada iyo Amniga :** Waxaa uu xoogga saaraa dhammaan badbaadada dadka ku hawlan wax ka qabadka dhacdada.

● **Sarkaalka Wacyigelinta Dadweynaha :** Waxaa uu la shaqeeyaa warbaahinta waxaana uu wararka u gudbiyaa dadweynaha iyo jaaliyadda xaafadda.

● **Sarkaalka Xiriirinta :** Waxaa uu la xiriiraa hay'adaha iyo taageerada iskaashiga dibedda.

● **Kooxda Hawl Fulinta:** Waxaa ay qabtaan tallaabooyinka muhiimka ah oo ay ku jirto gargaarka degdegga ah, raadinta iyo badbaadinta, dabdemiska iyo xaqiijinta badbaadada goobta.

● **Kooxda Qorsheynta :** Waxaa ay soo aruuriyaan macluumaadka, hore ayeey waxyaabaha uga sii fikiraan waxaana ay wax la socodsiiyaan oo ay xiriiriyaan dhammaan kooxaha

● **Kooxda Iskuduwidda :** Waxaa ay helaan, qaybiyaan islamarkaana ay kaydiyaan dhammaan khayraadka muhiimka ah (qalabka iyo dadka) si loo xaqiijiyo wax ka qabad wanaagsan.

● **Kooxda Maaliyadda/Maamulka :** Waxaa ay la socdaan dhammaan kharashyada, dalabyada iyo hawlaha, waxaana ay yihiin kuwa kaydiya galka dhacdada.

OO AY KUU SOO  
GUDBIYEEN :



[www.metrokc.gov/health](http://www.metrokc.gov/health)



[www.FirstVictims.org](http://www.FirstVictims.org)



[www.uwkc.org](http://www.uwkc.org)